Shir guddoomiyaha: Idihii baan weli ka sii dooneynaa. Dooddu waa naga go'day maalin dhoweed, dhowr eray oo inoo dhinnaa ayaan ku noqonaynaa oo uu ka mid yahay eraygan la yiraahdo shalmadda, uu ka mid yahay raqo oo ay ka mid tahay sararta noocyadeeda iyo inta ay u qaybsanto ama awlalka, waa sarar-macaanka (eraygii ku jiray heestii folklorka ahayd oo la sheegayey). Ido dhowro ma leh, oo dhaqayo ma leh, waxaa loo wataa waa socod-wanaag iyo sacab-ku-maal iyo sarar-macaan, awlalka iyo inta uu u qaybsamo iyo magacyada uu kala leeyahay. Waxa laga hadli doonaa oo kale waxa la yiraahdo barida iyo qaybaheeda, magacyadeeda, sida loo jaro iyo qiimaha ay baridu ku leedahay bulshada soomaalida ama aragtida ay ka qabaan; Legga oo isaguna hilib-mudanaha ah oo la siiyo wadaadada iyo dadka sharafta leh, iyo leggu inta uu u qaybsamo asaguna, dhanka uu ku yaal, kolka uu ka soo go'o neefka; majaha iyo qaymahooda oo ayaga neefku ku soconayaa (afarta Addin); lugta iyaduna inta ay u qaybsanto iyo xubnaheeda. Waxa kaloo ka hadal u baahan asaguna jeeniga; waxa kaloo u baahan in laga hadlo goorta iyo intay u qaybsanto. Waxaynu kaloo ka hadli doonna intay u kala baxayso laf-duudka lafta la yiraahdo. Neefku toddoba sare iyo toddoba hoose ayuu leeyahay. Toddobada sare sida ay u abuurmaan ayeynu ka hadli doonnaa iyaguna. Waxaynu kaloo ka hadli doonnaa, neefka marka la qalo, calool-ku-jirka iyo inta kale,gaar ahaan calool-ku-jirka inta uu u kala baxo. Maadaamaa aanu ka hadlayno idaha, sarartaasaa na gaarsiisay in aynu intaas oo dhan ka hadalno. Waxa kaloo aan ka doodi doonna, odayaal, waxa loo qabto xoolaha, hilbahase marka la qalo maxaa la kala yiraahdaa. Waxyaabahaas ayeynu ka hadli doonnaa. Maanta dadka arrimahaas ka doodi doona waxaa ka mid ah: Faqi Buraale, Saciid, Cali Muddiir, Daahir Afqarshe, Salaad, Dhegaweyne, iyo Axmadnuur oo qaybinaya warka. Haddaba, warkayga waxaan ku furayaa eraygii shalmadda ee uu haystay Daahir Afqarshe. Ereygaa shalmadda oo aan maqalno. Daahir Afqashe ayaan maanta warka ugu horreysiinayaa si' uu warka noogu saro oo uu sarmadii noo siiyo markaana laga raadraaco. Bal ku soo dhowoow eraygii shalmadda oo adoo ka hadlaaya uu warka kaaga go'ay.

Daahir Afqarshe: Mahadsanid. Axmadnuurow, shalmaddu, afkeena soomaaliga ah, macne kow loo yaqiinay oo iska macruuf ah ayaa jira. Horta shalmad waxaanu u naqaannaa, faraska marka la fuulayo ama rakuubka marka la fuulayo, sheygaas jilicsan oo rara jilicda ah, nooc kastaba ha ahaadee, oo cudbi u badan, oo kooraha laga hooseysiiyo oo ama ratiga garbaha loo saaro ama faraska loo saaro halkaa araxda yaan kooruhu qabanine. Kaasaa horta la yiraahdaa shalmad oo marka horeba meeshii uu lahaa aan, qaabilsiinno. Soomaalidu waxay leedahay oo kale, maahmaah oranaysay: "Koore la qaadyaaba, shalmadi waa tan". Haddii aan shalmad la saarin, faraskii lama fuulayo, rukuubkiina lama fuulayo oo mid waliba koorahaa wax yeelaya. Kooraha marka la saarana

waxaa ka sarreeya wax la yiraahdo bari-dhowr oo isna jilicsan oo laga sameeyo ari-carbeedka dhogorta weyne haraggiisa oo la jilciyey oo dhogortii dusha tahay yaa dusha laga saaraa oo bari-dhowr baa la yiraahdaa, ragga qaarkiisna shucubay u sameeyaan oo ay ka laalaadiyaa oo ay quruxda ugu sameeyaan, ragna sidiisuu isaga fuulaa. Shalmad sheygaasaa horta loo yaqaannaa. Markaas calaamadaha iduhu yeeshaan yaa neefka dhexda madow, halkii faraska kooraha la saarayey oo kale yaxda madow yaa la yiraahdaa shalmad. Hadday laxdu uurka madowdahana waa la yiraahdaa shalmad. Markaasaa, hooyada lehi laxda waxay u bixisaa shalmad oo ugu yeertaa. Haddii uu wan yahay waa shalmad lama yiraahdo oo waxa la yiraahdaa waa wan dabar oo idahaa loo faaiideeyaa. Horta shalmadi waa caynkaas oo aan saa u kala ogaanno. Idaha sifooyinkan aad ka sheegtay waa badan yihiin. Sheyga la yiraahdo sararta, haddaan qaato, iyadaad ku xijisay markaad ka warramaysaye. Sararta marka wanka weyn la qalo, saddex wasladood weeyaan oo la yaqaanno oo macruuf ah oo sarari saddex u kala go'an baa la yiraahdaa. Wanka weyn sarartiisa saddex meelood bay u kala go'daa oo la ka siiyaa oo dabadeed dheriga u qaadi kartaa. Inta feeraha saaran waxa la yiraahdaa saar. "Deyr ma qalatayo saar xabbeb lehi da' ma kuu yimid", buu yiri, labadii nin oo idaha wada waraabinayey midkood. Markaasuu yiri: “Deyr ma qalanine”, kii kale, “dugsigeedaan duunyo moodaye ka durduri xalay”. Waa kaasoo, hilibka waa ugu sii cajaaib badan tahay oo wanka weyn daarkiisa lagama sheekayn karo. Wuxuuna leeyahay xabuub yaroo saraan oo aad mooddo sidaa isugu gedfa oo baruurta iyo kaas xarkagay oo uu leeyahay " sidii awlalka xarkagay oo xayaabada xagga sare ku leh xaye mooye xoolo kale ma leh". Miid baa iska hurudda halkaa dhexe, biyo ah oo subag-madoobaha ah oo waxa la yiraahdaa "Wan biyoobay". Markaasaa miidaasu waxay doonaysaa mindi aan sidaa loogu kirkirine, sidaa loo taabsiiyo oo markiiba xagaa sare uga baxda. Marka sidaas bay sarartu tahay oo saddexdaas bay u kala go'daa. Sararta waxaa la siiyaa gabadha, reerkii ay ka dhalatay la taalla oo iska leh, oo jeeniga iyo dhinaca iyo waxaa lama siiyo. Ninka hiliyahanka ah ee afadiisa wanka weyn u qalay oo iyaduna ay taqaanno ninkaas sida ay ku nooleyso. Wanka marka la gowraco waxa loo jiifiyaa xagga bidixda, midigtana waa sarreysaa. Xagga bidixda ah uu dhiiggu ku gororay, dhinaca iyo jeeniga is-xiga ayey inta isu xirisaa habeenkaa u karinaysaa. Ma oggola lugaha, sararta iyo waxaan baruurta weyn ee xaggan dambe ma taabsiinayso; kolkaasey gurigana uga fogeynaysaa gogosha, meel aan sanuunta uga urin, illeyn sanuunta laqanyey keenaysaaye, oo meel cidla' ah oo dabeel leh ayey gogosha u dhigeysaa. Naagta beerka ninka u maqleysaa waa dileysaa oo marka waxba uu cunimaayo. Beerkoo la maqleeyey ninka la siiyo neef dambe taaban maayo. Isagoo aan waxba kale dhadhamin yey dhinicii iyo jeenigii xagga bidixda ahaa ee uu dhiiggii ku gororay, isagii oo meel cidla' ah oo dabeel leh oo halkaa ah guriga uga fogeysay ayey u keeneysaa, kolkaasuu isku goynayaa inta mindi xiirmo ah qaato. Maanta dambe haddow ceelka galo, 12 saac haddii uu ku jiro biyaha uun buu u harradayaa

ee uu marba qurqurinayaa dabadeedna dhididka ka daadanaayaa oo subaggii baa u diidaya inuu daalo.

**Shir guddoomiyaha** Waa waxaynu Daahir Afqarshe hadalka ugu hormarinnay, si' fiicanna waa uga hadlay. Kelmaddii halkaa aan ku dhaafno. Waxaa kaleetoo uu ka hadlay sararta. Sararta wuxuu Daahir Afqarshe u qaybiyey saddex qaybood. Anigu waxaan oran lahaa, inta aanan sararta ka hadlin aan awlal ka hadalno. awlalku markuu isasito waxa waaye sararta iyo dhinaca. Haddaba aan qaadanno sararta oo ayadaa mudan oo magaca wadata oo dhinacu waa iska raacaa. Anigu waxaan ku dari lahaa dulbaax. Waxaan kaloo ku sii dari lahaa oo kale oday-jecel. Odayjecel sararta ayey ku taal oo waxa waaye jiirta duudka ka soo go'da odayaashaa jecel, oo waa jilicsan tahay, waana ka laqanyo yartahay oo ayadu waa jiir. Waxaa kaloo jirta dulbaax jirtoo sararta waxay leedahay meel, sida leggga oo kale, carjawcarjaw ah oo aan ahayn xayaabada daarkana aan ahayn oo ayadana aad mooddo, xagga legga iyo candhadey ka timaadaayoo sida geela leggiisaad moodeysaa oo carjawcarjaw baa ku jirta. Dulbaaxdu waa tii Maxamed Cabdulle Xasan gabayga ku tirinaayey oo aad ayey u macaan tahay. Dulbaaxda, jiir waa ku jiraa oo baruur waa ku jirtaa oo subag waa ku jiraa oo biyo waa ku jiraan oo leggaa raaca dulbaaxda. Erayga dulbaaxda ah ee la leeyahay, hilibkaa cusub oo weliba neefta markaa ugu horreysa yahay oo neefku yahay mid markaa la qalay oo baruur leeyahay aad bay u macaan tahay, laakiin hadduu caato yahay neefku wax ka xun oo lama kari karo.
Waxaan hadalka siinaya Faqi Buraale.

**Fiqi Buraale** Horta sidaas Aw Daahir u balballaariyay sararta ayaan ku raacsanahay. Markaynu niraahno sararey xageebaad ka timaadaa? Sarari waxa weeye magaca AWLAL; awlalna waxa la yiraahdaa, waa xubin isku taalla oo ama toddobada cad ama siddeedda cad oo uu raggu cunijiray waagii hore, hadda wax waliba waa la cunaaye. Raggu waa gaajoon jiray,awlalna waxa ay cuni jireen ayey ka mid tahay. Awlal marka la yiraahdo waa dhinaca iyo sararta oo is-raacsan. Dhinaca, markaas, wuxuu u kala baxaa gabxarar iyo simeed. Sarartuna waa saddexda cad ee uu sheegay Aw Daahir oo ay ugu sarreeyaan saddexda feerood oo feercalaamaha ah ee ugu dambeeya. Midna waa midda laadlaadda oo biyaha iyo subagga iyo taharta, oo taharta arigu sida taharta geela u adagtahay uma adka ee waa ka jilisan tahay kana macdahay oo waxay sii-xigtaa xagga xuddunta. Cadkan kalee aad hadda sheegeysay waa kan gaalada ay tiraahdo filletto oo wuxuu saaran yahay dhilaandhilkaa sare ee duudka ah ayuu ka soo baxaa oo wuxuu u dhexeeyaa feeraha iyo dhilaandhilkaa taxanaha ah oo waa muruq saa u sallafan. Markaas, cad la cuno waa cadka ugu macaan, waana cadka ugu liita xooluhu markay caato yihiin. Markay shilis yihiin ama macaan yihiin oo xoogaa iska ladan yihiin waa cad ugu macaan. Marka xooluhu toogsadaan oo weeydda noqdaan inta jiirta leh ayaa wanaagsan ee intaas biya-galeenka, xayaabada iyo biyahaa isku fadhiya ee baruurta wanaagsan ee

dulbaaxda leh waa inta ugu wanaagsan marka waa inta ugu liidata. Marka dubaax marka la yiraahdo anigu waxaan u aqaannaa, marka sararta la gooyo, oo haragga laga saaro oo ama halla shiilo ama halla kariyee xuub koraa jira oo dusha ka saaran. Xuubkaas haddii la shiilane waa carjawcarjaw haddii aan la shiilinna wuxuu kuu sii-macaaneeyaa baruurta hoosta ku jirta. Baruurtaa waxay leedahay lakabyo, Ilaahay amarkiisa oo biyuhu ku jiraan oo baruurtu ku jirto oo dubaaxdii ku jirto oo xuubkii u hooseeyey uu ku jiro. Markaas, intaasoo cad markaa feerahaas halkaa u baxaan muruquna xagaas u baxo ayaa waxaa soo dhaca in laadlaadda oo xagga hoosta oo xoogaa xundhurta xigta, taas laadlaadda hadday xooluhu caato noqdaan lamaba cuni karo gebigeedaba oo waa iska carjawdaas kaligeeda ah oo aan jiirna lahayn baruurna lahayn oo aan la dhadhamin karayn; laakiin cad la cuno oo rag la siiyo laga xishoonayo ama loo roonaanayo, hadduu shilis yahay, cad ka wanaagsani ma jiro oo la cuno ama ha is-haysto ama kala gooniba ha ahaadee.

Shir guddoomiyaha: Haddii aysan jirin cid wax ka qabta intaa uu sheegay Faqi Buraale, waxaan u gubayaa barida iyo qaybaheeda. Inta aanan Daahir Afqarshe iyo Faqi Buraale u tegin, Dhegaweyne ayaan warka u gudbiyey si' uu wax nooga sheego erayadaas.

Dhegaweyne: Horta anigu, sararta sida ay labadaa abwaan u sheegeen, waxba ku aan dari maayo oo ayagaa dhammeystay. Sararta marka ugu horreysa iyo awlalka, neefka hadduu mar weynaado, waa kala gaar. Neefka hadduu mar weynaado sarartuna waa gaar awlalkuna waa gaar. Taa intaa u dhaafi maayo. Sararta, sida Faqi Buraale u sheegay, afar bay u kala baxdaa: karreys (halkaasey ku jirtaa waa u dambeeysaaye, hilibkeeda lama jeclae, meeshaa qanjirraa ka soo gala), midna waa gar-xararoo waa ku xigaa, sarartii weyneeyde oo wanaagsanayd oo la cunaayey, ama ninka loo xil hayo la siinayey, waa ka dambeysaa oo waa sida aad u sheegteen, xuubkii waa sheegteen oo kii saarnaa waa sheegteen.

Shir guddoomiyaha: Hadalkii Aw Daahir iyo ragga kale saan u maleyneynay ma noqon oo muranaa ka soo noqday, markii muran na soo galana hadalka waa ku noqonaa si' looga baxo. Waxaa jirtay karreysta. Inta aanan Daahir Afqarshe u gudbin, anigu aan wax ka iraahdo. Karreysta, horta, waa eray gooni ah oo waxa la yiraahdaa: “Kaligi cune, karreyste, kankamoow rag maa tahay" oo toddobada hoosey ku jirtaa. Midda uu u qaybshay sararta iyo awlalka oo uu kala reebayna anigu dacwaan ka qabaa. Dacwaddaan ka qabo waxa weeye: waa loo qaybin karaa sidaas laakiin marka toddobada hilib oo kale laga hadlayo, awlalku wuxuu u dhigmaa jeeniga ama legga ama lugta. Waxa waaye labada awlal iyo labada lugood iyo labada jeeni.

Daahir Afqarshe: Karreysta, sida Salaad sheegay, haddii aan neefka qalliin xumo dhicin, waxay raacdaa raaca hore, geelane waxay raacsan tahay gowraca. Haddii qalliin xumo raacdo, waa tii la yiri "Nin qalliin

yaqaanna sarar iyo gadoob isku hagaajiyae, qof aan aqoon uu qalana, karreysta waxay soo raacdaa awlalka", laakiin hadday cilmiyan ku dhisan tahay xagga horey raacdaa. Waxaa kale oo hadalka, halkan garxararka aad ka leedihiin waxa la yiri: "Ninka doonaya dhinaca inuu xumeeyo garxararkuu sarreysiiyaa, ninka doonaya inuu wanaajiyana gumaarkuu sarreysiiyaa oo baruurta buu dadka tusaa". Midda kale oo hadalka ugu soo celisay waa erayga dulbaax oo aan diidanahay. Dulbaaxda anigu uma aqaanno tan ku taalla awlalka ishaysta. Dulbaax waxaan u aqaannaa, marka laga jaro legga sakaarka qaba, baruurta halka saarane sakaarka haysata. Taasaan anigu dulbaax u aqaanna ee uu Sayid Maxamad leeyahay: "Illeen diqini calaf leh, dulbaax maxaa ka dayacay" oo waana baruur macaan waana baruur adag oo geelana noqota... noqota. Dulbaaxdu waxay saaran tahay sakaarka. Labada sakaar labada cag ee ku sameeysan waa in geelii xagalo yahay, kii arigana yahay dulbaax oo marka la dhaafo legga baruurtiisa halkaas tan ku jirta aan anigu dulbaax u aqaannaa.

| | |
|---|---|
| Shir guddoomiyaha | Eraygii dulbaax ahaa ayaa muran ka soo noqday waana ku habbooneed wixii la isku khilaafo inaan ku noqonno. Erayga Dulbaax, annagu waxaan Daahir Afqarshe leenahay, waa wax la socda awlalkoo dhan leggana wuu raacaa oo intaas iskutaalka ah yuu raacaa. Sababta oo ah, dulbaaxdu hilib annaga noo go'an oo meel go'an ku yaallaa aniga iima ah. Waxa waaye baruurtaa oogada saaran oo weliba kala dhexgasha baruurta weyn oo duleedka la yiraah oo kor saaran iyo feeraha kala dhexgasha, oo aadka u macaan. Waxaan hadalka ku celinayaa si' uu ugu noqdo asna. |
| Salaad | Maxamadow mahadsanid. Dulbaaxda idaha kaliya ma gashee ee waa gashaa riyo iyo idaba waana neefka buuran xuubka yar oo baruurta ka korreeya marmarna neefku hadduu sii baruur badan yahay, mar baa la arkaa inay laba baruuroodoo lakab ah kala madhaa. Anigu eraygaa dulbaax la yiraahdo kaas baan u aqaan. |
| Daahir Afqarshe | Horta hadalladaas la wada yiri kulli waa wada jiraan; waxaanse anigu u aqaanna bil matal neef idil oo baruur badan oo nimaad jeceshahay siinayso waxa la yiraahdaa tunka ka dulbaaxso. Sidaa Aw Daahir u sheegayna waa jirtaa oo waa sakaarkaa iyo shafka. Marka, marka la yiraahdo tunka ka dulbaaxsane mid loo tilmaamay ma jiro ee waa baruurta hoose ha u daadegine tunka ka dulbaaxso weeye. Kii hore ee Aw Daahir xaggiisa ahaane waan ku raacsanahay oo marka la yiraahdo gadoob waa wixii toddobadaa cad ka duwan; marna waxaa la yiraahdaa xaab. Sidaa Aw Daahir u yirina karreysta waxa la yiraahdo waxaa la siiyaa asalkeedaba gabadha yaree ariga la jirta tunkeyna raacdaa oo sida Aw Daahir tarrahay raacda, waa laba feeroodoo isku lammaaansan. Haddii, sida Aw Daahir u sheegay, qalliin xumo ayan dhicin, bahashaas karreeysta ahi had iyo goor waxay raacaysaa sarraxa, dabadeedna waxay soo raacdaa oo loogu tegayaa labada sin midkood (laba karreysood baa jira oo raaca simanka); haddii goonideeda loo |

gooyana gabadhaa la siiyaa ariga la jirta. Laakiin hadday qalliin xumo dhacdo waxay raacaysaa dhinaca sararta ku yaalla oo ka horreeya.

Shir guddoomiyaha: Horta karreysey, gabadhi baaba sheegtay oo waxay tiri, wiilka markae caayeeysay: "Kelyo cune, karreysta i dhibay war kanow ma rag baad tahay" oo labadaa erayba waa ku cayday. Kelyaha iyo karreysta raggu ma cuno oo lama siiyo. Labadaa karreysood gabadhaa la siiyaa.
Waxaa hadalka u gudbinayaa Calimudiir.

Cali Mudiir: Waxaad moodaa saaxibyaalkey inay ku dul noqnqonaayaan gobol gaar ah dhaqankiisa oo annaga reer-banaadirka ah inaanan hadalka waxba ku lahayn. Erayga dulbaax suaalaan anigu ka qabaa waxa weeye hadalkii ugu dambeeyey, ee Faqi Buraale, ayaan u aqaan. War hadalka dulbaaxsoo dulmaroo ha ugu daadegin, sarbeeb ahaan ma la yiraahdaa? Waxa aan dusha laga wada qaadan amba in la wada qayaxtiro aan la doonaynin oo dhan baan anigu u aqaanaa. Sidaas ma igu raacsan tihiin? Midda kaleeto, habka kan loo qasho xayawaanka, waneyda durraamada loo qasho sow uma soo daadegtaan. Cid uun xayaankeeda qalatee ninba sow doona u qasha kaliya ayaad ku dulwareegeysaane, bal noo soo daadega. Aniga waxaan aqaannaa hadal ka duwan oo la yiraahdo xaab. Wanka haddii turraamo loo qashoo ee lagu duceysanaayo oo la qaybinaayo habka borotokoolka. Sideedaba annagu waxaa suurowdaba, dadkeynaan ree-koonfurka ah, marka wax la qalanaayo inay u badan tahay duco ama durraamo ee markaa borotokool loo qabto yaa curad ah? iwm. Midda kaleeto, shiiliinka, xoogaa takhtarkaan xusuusinayaa hadhow suu uga hadlo, yacni hilibka la shiilo oo cusbada leh dhiigga ayuu kariyaa maxaad ka qabtaan? Hadalladaas oo dhan waa suaalo idiin imaan doono, waana ka baxay.

Shir guddoomiyaha: Waxa weeye, marka u horreeya waxakan waa noo dambeeyaa. Anigu haddaayo waxaan qoray war waxaana u sameeyey sidii uu u kala horreeyey: warkaas waxaan u dhigay siduu iigu soo dhacay. Hoos yaa loogu daadegi doonaa ee ha sugi weynin. Laakiin hadda waxa weeye, maalin dhoweed banu erayo mareynay oo erayadaas baynu mareeynay, kelmad baynu qaadanay waan ka baxnay, sarar baynu ku xijinnay, bari baynu ku xijinaynaa, lugteynu ku xijinaynaa, majahaynu ku xijinaynaa, jeenigeynu ku xijinaynaa, qoorta iyo tumanka is-haysta iyo sida ay u kala baxaan, macasha ayaan ayadana ka hadleynaa, madaxa ayaan asagana ka hadleynaa, lafduudka iyo inta ay qaybsantaan ka hadleynaa. Xoolaha see loo qashaa baynu ka hadli doonna. Marka tartiib baan uga hadleynaa si' aan warka inoo ka baahin ama qofka maskaxdiisa ay meesha ugu jeeddo. Hadda waxaan ka hadalnay sararta, haddana waxaan ku xijinaynaa barida. Erayga dulbaax aniga iyo adiga isku mid baan ka nahay. Ma aha wax go'an waa taan iri. Daahir Afqarshana sax buu ku yahay oo eraygaaba noo sheegaaya oo waxa la yiri: "dul

bax" oo waa baruurtaa dusha saaran. Haddana waxaan warka siinayaa Dhegaweyne.

Siciid: Eraygan ah sarartii ama neefka hilibkiisii aad iyo aad baa odayaashu uga doodeen. Waa dhici kartaa in hadallada meelo la isku khilaafo, taasoo ay keenayaa degmooyinka kala duwan, laakiin badi hadda sida muuqata waa la isku dhowdhow yahay. Marka anigu waxaan ku darsan lahaa waxa weeye: Eraygan dulbaaxda anigu waxaan u maqlay ama u aqaannaa, hilibka marka qofka la siiyo, nooc kasta ha ahaadee, ee uu caato yahay ayaa qofka lagu raalli geliyaa oo waxaa la yiraahdaa: "Hilibkaas ka dulbaaxso" ee marka neefku buuran yahay lama yiraahdo ka dulbaaxso, anigu sidaan u aqaan. Tan ah karreysta; karreysta waxa weeye dhinaca qaybta feeraha leh, markay xirirsan yihiin, laba feerood baa taxan, labadaa feerood baa qaybtii noqotay oo intii kale waa israacday. Dhinacaa dabadeedna qaybsamaaya oo sarar iyo awlal. Labadii karreysood waxay raacayaan, sida ay odayaasha u sheegeen, qaar simankay raacaan oo qaarka hore waa la isku geeyaa oo sinta inta ah waa israacdaa. Marka la qalaayo waa laga jiraa, laba feerood weeyoo oo mar waa laga wada jaraa, marna mid laga jaraa oo ah tan weyn (waa laba feerood oo kala yar) oo ilmahaa loo homariyaa si' ay ugu sii sugaan hilibka kale.

Shir guddoomiyaha: Horta marka ugu horreeya, eraygan dulbaax muran kama taagna oo waa wax dulbaaxsi leh oo waa dul iyo baax. Dul waan garanay, baaxna waan garanay. Aan ka baxno, waa sida odayaasha u sheegeen. Waa baruur aan meelna haysan oo meel dulsaaran. Waxaan warka u gudbinayaa Dhegaweyne si' uu uga hadlo barida iyo qaybaheeda.

Dhegaweyne: Waxa weeye horta, hadalka odayaasha inta kale uu soo maray haddana aniguu isoo gaaray. Waxaa la marayeyna wuxuun baa ka lahaa. Horta marka sararta iyo awlalka leedihiin cadka awlal baa la isku yiri. Dulbaaxdatan aad ku daasheenna, neefku hadduu hilib macaan yahay oo hilib wanaagsan yahay oo la yiraahdo: War neefka hilib macaanaa waxa la yiraahdaa neefka dulbaax buu ahaa. Karreysahan aad sheegteen marnahays baa la yiraahdaa oo geela waa laba. Dad iyo duunyo waa labada halkaa inakaga yaal . Waa tuu ninku ku gabyey ee uu lahaa: "Marnahaysta iyo gowrac waa laba mataanoode". Baridii baan idin kaga warramaa oo haddan ka sheekeynaya. Barida anigu waxaan u aqaanna: laba doollood iyo dadab iyo dabadhilif. Dadabku, aan horreysiiyee, waa inta aan dhogorta lahayn oo uurka ah ee hadhow barida marka la goynaya yaa la isku gooyaa ayada iyo baruur loo habraha u yimaadda ee soo salaama iyaa naaguhu siiyaan (sadaqo). Labada doolloodna waa labada doollood oo miduba barbar tahay. Dabadhiliftunana labada doollood bay ka korreysaa oo waa tan neefka dibkiisu ku fadhiyaa oo taa kuuskaa yar ah. Waana cadka, idaha marka la qalo, oo ayada, haraggaa lagu reebayaa waxa raaca weel gooni ah ayey leedahay, weel gooni ah ayaa la siinayaa oo waa iska dawo halkaa iska taalloo hilibka kale lagu darimaayo

iyada. Haddii la loogo oo wan weyn la loogo tirada waa loogu dara dadka oo inta la kariyo waa loo geeyaa; laakiin wan weynoo reerku qashay hadduu yahay, barida weel gooni ah ayey iska leedahay, weel gooni ah baa lagu shiilaa oo hilibka kale iyo barida isma dhexgalaan. Baridu, mar haddii subagaa laga shiilo, iyadu hilib macno leh ma laha oo kiliilyaa la yiraah oo carruurta iyo waxaa baa isaga madadaasha. Neefka baruurta ah ama dawo ha loo qasho ama reerkaba ha qashae, barida subaggeeda iyo subagga baruurta kale la iskuma daro oo waa ka gooni. Naagta fiicanina weel bay leedahay aan baridaa mooyee wax kale lagu shiiline oo ninka hadduu ido badan leeyahay, naag fiicanna qabo weligii ubbadiisa bari kama maraneyso. Barida waxa la yiri waa dawo oo wax badan bay dawo u tahay. Aniguna wax badan baan isticmaalay. Dhowaantan, beri dhexdan ahayd, laba waxarood oo ugub ah, baa midba mar qashay, iyadoo mudo badan u dhexeyn baan iska daba qalashay. Waxaan ku dembi la'ahay, muddo saddex sano ah inanu madaxu i xanuunin, cudurkii aan u qashay mooyee; waxaana iigu cajaaib badnaa waxa aan gadaal ka dhigay.

Shir guddoomiyaha: Inta aanan Daahir u gudbin ayaan xusuus yar rabaa inaan idiin sheego. Nin aan wada naqaan, oo la yiraahdo Xaaji Aadan Afqallooc, ayaan waxaan iri: Afqalloocow imisaa jirta? Wuxuu yiri: Boqol iyo soddon ayaan ku sii-dhowahay. Wuuna kula laacdamayaa oo kula legdamayaa. Xaaji Afqallooc, nin oday ah oo weyn, la yaqaanoo, gabyaa ah, ragga taariikhda Soomaaliya aqoonta dheer u leh ayuu ku jiraa. Waxa waaye, abwaaniinta Soomaaliya hadda joogta kuwa ugu horreeya oo wuxuu noqonayaa ninka koowaad ama labaad. Aqoonta ruuxeeda aad buu uga dhisnaa. Afqallooc baan waxaan iri: Xaaji Afqallooc maxaa cuntaa? Wuxuu yiri: Wallaahi garan maayo. Waxaan iri: Xaaji, sigaarka waa cabta, qaadkana waa cunta, waana gabyda, intaaba waa dil; laakiin wax kuu qarsoon baa jiree, Xaajiyow ii sheeg. Saaxiib baanu nahayoo wuxuu igu yiri: waxaan kuu sheegi karaa ma jiraan. Maxaa cuntaa baan iri. Wuxuu yiri: Weligey subax ma bari la'ayn, oo haddaan bari waayo waan jirranayaa. Waan jitaabiyey, oo Madina meeshuu joogi jiraye,ayaan anna meeshaas subaxdi soo fariisan jiraye. Haddii uu baridaa tebo wuu qaylinayaa oo wuxuu leeyahay aryaa bari ii soo gada, ar waa liitaa buu leeyahay. Markuu baridaa helo waxaad arkeysaa asagoo kula legdamaaya. Afqallooc waa nin ku fiican in taariikhdiisa laga sheekeeyo, haddana waxaan sheekadaa yar u keenay, waxaan rabaa inaan Daahir Afqarshana sii cariyo oo aan sii liido, oo aan barida tuso bal waxay tarto iyo waxay guddo iyo waxay tahay, si' uu inoo ku sii faahfaahiyo iyo waayoaragnimadiisa, waxyaabaha uu maqlay iyo maahmaahaha.

Daahir Afqarshe: Mahadsanid. Barida idaha, sidaa uu u sheegay Dhegaweyne, labada la siiyo haweenka martida ah, ama markii ay gabadhii barida siisay labada meeloodoo labada barbar barida kaga yaalla ee madow, iyo madiibad subag ah ay laba islaamood ee u soo wareegay siisay oo ay tiri: Xaawo iyo Faadumaan u bixiyey. Horta barida waa sheeygaa iska khaaska ah oo la jecel yahay. Baridu,

maalintii dhoweedna waa tii laga wada hadlayey oo sidey takhtarradu u yaqaaniin ee jaallahay Saciid maalintii dhoweed arrimaha qaarkood u durayey ee isagu, xagga dakhtarnimada, meelaha qaarkood ku diidayey iyo soomaalidu sida ay u taqaannaa xoogaa waa kala gaar. Soomalida waxay tiri: "Bugto iyo bari idaad meel ma wada fariistaan". Soomaalida, waagii horoo aan dhakhtarro jirin, dawo waxa u ahaa barida idaha, waxyaalo ay kala cararaanna waa jireen, sida dhakhtarrada xagga beerka uga diidayaan. Waxyaabahaas waxa ka mid ahaa, wixii dagaalkii labaad ee adduunweynaha wixii ka horreeyey adduunku ilbax ma ahayn, mishiinka tirada badan leh ee samada iyo badda iyo berriga marayaana ma jirin. Waqtigaas, dadku reer-miyi buu xisaabsanaa shanta qaaradoodba. Waayo waxa lagu garanayaa, dagaalkii hore oo "dagaalkii adduunweynaha ee koowaad" ee 14kii bilawday, Jarmal iyo Ingriis, kuwii israacsanaa, makiinado ay ku guuraan markii ay waayeen oo ay dagaalka ku galaan, awrta soomaaliyeed iyaa Berbera laga dhoofin jiray oo dabadeedna u bixi jirtay arlada kale ee Yurub iyo arlada lagu dagaalamayo oo loo raran jiray oo dadka sideynii oo kale buu ahaa. Waxaan sheekooyinkaa u soo qaadanayaa, hawadii baa iminka qayirantay, markii ay qayirantayna waa ay sumoowday, caafimaadkiina wuu yaraaday, manaaficaadkii soomaalidu ay ku noolaan jirtayna ee hawadaas nadiifka ahaydna waa qayirantay, gayaankii baa markaa hallaabay. Waxa jira waxyaabo laga yaabo inaydaan runba iiga qaadanin, haddaan anigu idin kaga sheekeeyo. Waqtigii dhowaa ee ina Cabdulle Xasan la kiciyey, 1920kii, Ingriiskii ka soo degay Laasqoray oo ku soo duulay magaalada la yiraahdo Baran ee haddeer looga dhigay degmada Laasqoray, ayaa darwiishkii habeenkii daartaa dusha ka ilaalinayey, darawiish kalana hareerahay gaar ka tahay, markii habeenkii nus haray wuxuu arkay nin sigaar cabbaya oo soo socda, askarta looma oggola sigaarka inay cabto, lama canaantaa caano daadiyeye, ninkii faranji ee colka watay isaga sigaar shitay, darwiiskii gaarka ahaa ee daarta dusheeda taagnaa wuxuu yiri: Waxaan arkay dab aanan anigu weligey arag yaa ii muuqday. Markaa dabadeed dabeysha isbeddeshay awadeed baa horta bukaankan badan, cunnadii oo isbeddeshay iyo is-dhexgalkan, iyo dadkan tirada badan ee cudurrada isqaadsiiya ee Qaaradaha iga gubaya, ayaa tabdiil xoog ah dhacday. Haddaba, ninkii darwiishka ahaa ee daarta Baran la yiraahdo dusheeda taagnaa ee gaarka hayey ee yiri waxaan arkay dab aanan weligey arag. Oo sidaad u aragtay? Waa la wareeystay oo wuxuu yiri: siddeed goor yuu bigbig yiri oo baqtiyey dabkaas. Markaasaa la yiri halkee baad u maleynaysaa. Wuxuu yiri: inay meeshaas ahayd Dix-dhaaxood. Dixdhaaxood iyo meesha uu dabka ka arkay gelin baa loo kala dhexaa, waa waxan lahaa haddaan idinka sheekeeyo waxaa suurowda inaad baciidsataan. Markaasaa la yiri: Bal halkaagaa uun taagnow oo wax ilaali. Kolkaasuu yiri: Dabkaa ka baxaaya Dixdhaaxood wallee waxaa soo degay duul shisheeyah. Salaaddii orooryo markay ahayd yaa militarigi oodda kaga qaaday rasaas, dayuuradihiina taar bay u dirteenoo waa la ballansan yahay oo Dhuurcellaan bay ka soo duulayaan oo xilliga ay imaanayaa bay ka

fogaanayayaan garnaylka, markaasaa dabadeed dayuuradihiina imaanayaa oo isdhaafayaan oo darandoorinayaan oo dabadeed halkaasey digada kaga dhigayaan. Dawiishkii gaarka ahaa wuxuu socod ku qaadayey: "Wallee dabkaa Dixdhaaxood wax soo degay duul shisheeyaa". Daarta dusheeduu wareegayaa oo waa wilgeynaya. Sidii uu sheegayey bay noqontay, dab aanu weligii arki jirin buu noqday. Waxa la ogaaday dabadeed, ciidankaas soo gudayey sarkaalkii watay markuu dhaxamooday inuu sigaar shitay, askartana uma oggolayn. Halkaa waxaynu ka ogaanay sida waaga hawadu ahayd iyo sida dadku u indho-fiiqnaa ee uu meel fog wax uga arkaayey. Markaas soomaalidu waxa ay qabtay indhafiiqnaantas iyo waxaasoo dhamina soortii xoolaha ee nacfiga lahayd yaa indhafiiqnaantaas iyo waxaas oo dhan wadatay iyo hawadoo aan qayirrayn. Taasi maanta ma jiraan, ninka looga sheekeeyana wuu la yaabaayaa, sidaan amba idiin sheegay ama aan idinka cudurdaartay. Baridu waxa wax lagu daweeyo ayey waagaas ahayd badanaa. Bal wax la yiri: Haddii kaneeco dhalato oo ay dadka cunto ee aan dhakhtarro jirin sidee dadka looga daweyn jiray? Nugaalba ka soo qaad, waxa la qali jiray ido baridaas ayaa dadka oo dhan qof walba xoogaa yara la kabbisiin jiray, oo waxa la kabisiin jiray inta aanay kaneecadu cunin ee la ogaaday inay dhalatay aanay soo ridin dadka. Waa dabadeed la qabay, ninkii cuna oo dhiiggiisa ku jirto inay kaneecadu nafteeda wax noqonayso. Haddii ay soo riddo qofka oo qofku uu xanuunsado dhilmaayadaa awadeed oo bari la siiyo, hortaa laga aasayaa. Labadaa cilmi ayaa loo kala waday. Dawooyinka maanta la isasiiyo, waagaa dadka bari baa u ahayd oo la isku daween jiray. Dacartatan iyo quwadda ay qofka u yeeleyso waa iska gaaroo soomaali loogama sheekeyn karo. Haddii qof nabar ku dhaco, dawada maanta la marinayo, qofka nabarkii cusubaa ee hurgunka ka ilaalinaysa, lama haysanin oo baribaa ahayd oo hurganka ka ilaalinaysay. Maxaa la sameynayaa? Baridii inta waslad yar laga soo gooyo ayaa dab lagu qabanayaa, iyadii oo dhalaashay oo tiftif leh yaa meeshii la taabsiinayaa,way gubeysaa; dib dambe dabadeed loogu arki maayo wax xaabaq ah oo dambe. Waxaa kale oo anigu indhaheygan saaray, laba wiil oo yaryar oo geel la jooga ayaa mid mid kaga laalay godin geed harreeriyah, wiilkii markaasuu isyiri godintii la soo deg, geedkii buu ka soo dhacay. Qori fantiiq ah oo dabadeed dhexdhexaaddaa ku sameysan yaa halkaa budda ah ka qabsaday. Qorigii wuu dooxay wiilkii; waa laga soo bixiyey, calooshii ma muuqato midhaa xuub yar baa haystay. Fiidkii markay ahayd oo wiilkii guriga la keenay oo sidaa meeshii loo hayo ayaa, illeen wax kale loo garan maayee oo dadku waa reemiyiye, la yiri: war caano soo siiya waa gaajoonayaaye. Wiilkii caanaa la siiyey. Waa nin halkan ka dhaawacane wuu hunqaacay, colooshii kolkaa dig tiri ayuunbaa la arkay calooshii oo dhulka iska taalla. Qaylo iyo muusanaaw baa meeshii ka dhacay. Meeshii baanu ku soo yaacnay. Ninbaa marka meeshii, raggii ugu macruufad roonaa, raggii Daraawiishta ka mid ahaan jiray oo markaa noolaa oo raggi dhaawacsanaan jiray arkay, wiilkiiyoo caloosha bannaanka iska taalloo, ayaa neef ida ah la qalay. Ninkii baridii buu yiri ii shiila. Sida

dhakhtarrada u faraxashaan oo kale ayuu u faraxashay, markaasuu asal gallaw biyo ay ku jiraanna gacmihii buu gelgeliyey. Biyo uu asalgallaw ku kariyey ee la dagaallamaya jeermiska dambe (hurgun) oo diirran qofkana aan wax yeelayn, ayuu digadii wiilkii kaga mayray oo ka dhammeeyey. Markaasuu mid waliba meesheedii ku celiyey; markaasuu tolay nabarkii wuxuu ku tolay timo naageed. Markaasuu baridii halkan tiillay dab inta waslad yar qaadoo saaroo qori sidaa u geliyey ayuu intuu dhalaaliyey ayadoo safsaf leh ayuu intii yareedoo uu tolay mariyey, calaashaan si aan jirmis dambe u yeelanin. Markaasuu yiri: Wiilka waxba noqon maayee, waxaan doonayaa anigu inaan qaado oo reerkeygii geeyo, weydaan dhaawayn karin. Reerkii baa yiri maya waa dhaawaynkaraynaa. Xukun buu ka ridaya oo wuxuu soo qaaday qarbad, markaasuu ye qarbadkaa biyo ugu shuba. Qarbad weeyaan bislaaday oo maged noqday oo waayeel ah oo aan biyihiisu aad mooddo biyo tallaagadood oo kale qabow. Biyahaas halkaa ha u yaalliin buu yiri. Baridii neefka laga shiilayna halkan buu u dhigay.Wuxuu yiri: wiilkaa waxaa la siinayaa subaxii fandhaal subag ah, habeenkiina fandhaal kale; marka uu harradana, biyahaasaa xoogaa qabow ayaa la siinayaa, jirjirkuu isaga jiifayaa. Waxaan u diidayaa, buu yiri, inuu kaco oo saxaro ka timaaddo, ama kaadi uun ka timaaddo, labadaba waan u diidayaa, illee waxuu cunaba u diidye, jirkuna waxba noqon maayoo waaba quwadeysanayaa; maalintiina isagu wuu yimaadda oo waa eegaa. Toddoba ayaamood markii ay joogtay, ayuu dabadeedna ka furay tolonkii, wiilkii oo bogsaday oo jidaarkaa ka xoog weyn oo midhaa jirku wuxuu qaadanayey, baridaanaaba uga xoogweyn cunnadii badnayd. Wiilkii oo baanqaatay oo naaxay oo tunku intaa la egyahay oo ilaa intii aan kaadshin oo xagga dambe wax ka imaanin oo baanqaatayoo nooc gooni ah. Maantaasuu dabadeedna wuxuu doonaba u fasaxay. Waxaas waxa sameeyey barida. Marka baridu soomaali waxay u qaban jirtay wax laga sheekeyn karo ma aha. Sidaas awadeed bay yiraahdeen: "Bugto iyo bari idaad meel ma wada fariistaan". Subag in kasta uu sidiisa kale u qiimo badan yahay ayaa baridu siyaado sii tahay. Haddaad iminka tagto Booraame wixi ka balleeya, ninka, ilaa saan loo geddiyo oo isaga iyo haweeneydiisu ay subag ku seexdaan, maba la aqal gelayo. Waxa la doonayaa jirkaan oo dhan in subag la siiyaa. Xagga madaxna iskaba daayoo waxaa la doonayaa gobo'gobo' inuu ku hayaa. Waxaa dhacday, magaalada la yiraahdo Boorame, meesha militarigu ku xareysan yahay oo Goroyacawl la yiraahdo, ayaa laba kruuud ee cusub milaterigii ah yaa la isugu keenay. Waxaa la yiri "Yey isleynine" qaarbaa lagu kala ooday, xerada ha ku wada jiraan. Kuwana waxaa laga soo qaaday Buuhodle kuwana waxaa laga soo qaaday Ashaaca. Markaasaa kuwa Buuhodle iyo Howdka ka yimid yaa faduul miiran ah, kuwa marada markiiba subag baa la gelinayaa oo mara jirka wax yeesha oo iska qafiif ah lama oggola oo maro subag leh baa la doonayaa dadku inuu huwanaado. Kuwii baa yiri: Hee dheh ma saabuun baa weydeen oo uskagan iyo waxan isaga meyrtaan, Maryan waa maxay tacabkiin ba'yeye. Kuwii xagaa ahaa ayaa yiri: Cayr baa tihiinne haddaad meel xoolo

leh ka timaadaan, jirkiina ama maryihiinna subag lagu arki lahaaye oo waa cayrnimo waxa meeshan idin keenay. Nimanki waa istuurtuureen, meesha dhagax bay leedahay, waa isdhaawaceen oo labadaa hab bay kala wataan. Qolana waxay leedahay waa cayrnimo waxan ay nimanku isaga meyri waayeen subagan ay isku shubayaan, qolana waxay leedahay dharkan khafiifka ah waxay u sitaan waa cayrnimo. Laba han weeye. Nimankii markii dambe iska heshiiye dabadeedna la tababaryoo waa kaa. Maalintii ay tababarka ka baxayeen uu nin janan ahi uga yimid London oo la eegayey. Kuwii dhulka kale intaa in la egoo tacliin ah ma eeyan qaadanin. baqshiiskii waxa la wada siiyey kuwii subagga qaadanayey, waa ka wada xoog weyn yihiin oo waxay soo baxeen libaax oo kale.

Shir guddoomiyaha: Horta ninka la yiraahdo Daahir Afqarshe aad baad ugu dheeraatey barida iyo sheekadeeda, rag badanna way dhinnaayee laakiin sheekooyinka aad sheegtay kulli waa loo wada baahnaa oo lagama maarmaan bay ahaayeen. Walow aad mooddo Daahir Saciid yiri bari wax ma tartee oo iska macmalad soomaali oo isaga iyo takhtarraduba  inay qofka jirro u keeneyso ayey qabaan. Waxaa kale ee ay qaban odayaasha waayo-aragyada ah, oo aad iyo aad u yaqaanna, waayo-aragnimada dheeraadka ah leh ee dhibaatooyinku la soo gudboonaadeen waxay ayagu u arkaayaan inuu yahay tijaabooyin iyo waayo-arnimo la gaaray ee aqooneed ee aan la dhayalsan karin oo aan la yareysan karin. Takhtarraduna waxay qabaan in wax kasta cilmi lagu dabaqo, oo cilmigu wuxuu mudan yahay ee uu na farayo aynu raaco oo weliba khaasatan cilmigan dhibka la yiraahdo ee takhtarrada ama dawada aynu raacno. Kaa waxaan ugu garqaybinlahayn innagu, cilmiga waxa waaye waayo-aragnimo natiijo ka soo baxda. Marka waayo-aragnimada odayaashana waa ku jirtaa meesha oo waa lagama maarmaan, waayo-aragnimada takhtarradu meesha waa ku jirtaa waxay u baahan tahay kaliya baaritaan la sameeyo oo labada dinacba.Labada aragtiba waa loo bahan yahay oo waa lagama maarmaan.

Haddana hadalka waxaan u gudbinayaa Faqi Buraale, isagana bal inuu wax inoo ka sheego lugta iyo qaybaheeda iyo majaha.

Fiqi Buraale: Horta marka aynu eegno xoolaha ama dadka (dad iyo duunyaba) waa siman yihiin oo addimadooda iyo indhahooda waa siman yihiin, in kasta oo kala duduwan yihiin, oo kala namuun yihiin. Sidaa, haddaba Axmadnuurow aad tiri, lugta ayaad ku soo koobtay inaan wax ka sheego  iyo sida ay u qaybsanto. Lugtu waxa weeye addin ka mid ah afarta addin. Markaa lugtaas waxay ka soo abuurantaa marka ugu horreysa qaarka dambe ee xoolaha; qaarkaa dambe oo ah sinaha, waxayna ku fadhidaa misigta oo lug weliba misig ayeey haysataa, iyadoo misigta daloolkeeda ku haysata afka ugu horreeya ee bawdada, xidid yarna uu halkaas misigta kaga soo jeedo, oo ay is haystaan tagoogta dusha ka haysa bawdada oo in yaroo kuusan ah afkeeda ugu horreeya oo ay isku xiran yihiin misigta sinaha dambe ah; halkaasey ka soo baxdaa. Marka intaa

ugu korreysa kolka xubnaheeda la tiriyo, bowdaa la yiraahdaa, saan u aqaan anigu. Marka jiir iyo lafba waa u qaybsantaa; lafteediina waa ku jirtaa hoos bay jirtaa. Laakiin lafta iyo cadkaba waxaa la isku yiraahdaa bawdo. Ka soo gudub, bawdadu markaa dushii hore waxaynu ku sheegnay inay ka haysato misigta, kan dambane waxay haysataa shanshada. Marka shanshada iyo bawdada waxay iska haystaan meel saas oo kale ah. Markaas misna waxaa is haysta jiirkooda oo dadka qaarkiisa yiraahdo canjuf qaarna yiraahdo jiirweynta , qaar inta laadlaadda shanshada yiraahdo oo cadka hoose ah. Marka , arrimahaasaa saas hilibkeedu u soo taxnaa oo hoosta had iyo jeer xiga oo xagga boqonta ka xiga. Xagga hoosta oo lugta markay saas u taagan tahay, dhinaca hoose, bowdadu waxay kaga abuuran tahay ama isku xira kuraankur iyo duubiga shanshada ay ku fadhido. Marka halkaa laga socdo, shanshadii duubi bay yeelataa, hilibweynkeedii xagga bidaxa ka soo korreeya duubiga ah, boqontaa dheer iyo shanshada cadkeeda weyn yaa is haysta. Bowdadiina waxay iska haystaan, shanshadii oo laftii duubigii leh iyo kuraankur xagga hoose ka haysa oo isku xajinaysa amarka Ilaahay. Markaas duubigaas markuu baxo oo aad duubiga dhaafto waxaad u tegeysaa majihii. Majintii baa u tegeysaa, oo majin-dambe la yiraahdo maxaa yeelay addin waliba majin buu ku taagan yahay oo manjo hore iyo majo dambe ayaa la ka yiraahdaa. Marka majintii hoose oo seedaley u badan macal lafteedii, lafna leh sedana u badan, laakiin aan hilib lahayn ee harag, seed iyo laf ah. Waxaa markaa loo tegayaa, majintaa markaad dhaafto, cumaacumihii. Cumaacumihu waxay yeelanyaan xubno kala go'goan. Markaas waxa la yiraahdaa xoolaha, markey caatoobaan, oo abaari ku dhacdo, oo ay weyd noqdaan, oo ay joogsadaan, xageebuu ugu dambeeyaa dheecaanku. Waxa la yiraah cumaacumaha, waa laba xubnood oo miduna ay majinta haysato, miduna ay raafka haysato qanjaafusha ah oo laba jeex kala ah. Markaasaa waxa la yiraahdaa konton-ma-dhaafto. Markaasaa waxa la yiraahdaa dheecaanku xoolaha laba-raaflaha ah wuxuu ugu dambeeyaa konton ma-dhaaftada. Geelana waxaa la yiraahdaa waxa laga eegaa, inuu macyahay iyo inuusan macayn, markaad gowracdo oo dhuunta ku dhufato, dhafoorka. Halkaa dhafoorkaa toorrey lagaga dhiftaa oo hadduu macyahay xyr baa ka soo boodeyso, haddii kalana biyaa ka soo boodaya. Waxa kaloo la yiraahdaa, marka iduhu aad iyo aad ugu abaaroobaan, leg iyo bari kala haraan waxaa dheecaanka ku dambeeyaa legga. Markay bariyu dhammaato oo ay eber noqoto, legga intaas hoosta ku jirta ee caaradda u horreysa ah ee labada feerood dhexdooda ah yaa dheecaanku kaga haraa, halka ma aragtay dhoorka ugu horreeya; kaasaa la yiraahdaa. Haddaba lugtii haddii aan soo tiriyey wuxuu noqday: bowdo, shansho oo magaca guud ah, duubi oo shanshadii la socda, majin iyo raaf ama camaacum iyo qanjaafulo (laba waaweyn iyo laba yaryar oo ku yaal majaha oo laba waa labada uu ku socdaa, labadaas dusha majinta iyo qanjaafulaha hoosana waxa la yiraah qurdo oo anigu u aqaannaa). Konto-ma-dhaaftana waxa weeye taas yaree cumaacumta xubinta ugu hooseysa ee ay ku fadhido qanjaafushu, dheecaankuna

halkaasuu ugu dambeeyaa marka la yiraahdo laba-raaflaha.

Shir guddoomiyaha: Haddii uusan jirin, aniga kolba saasaan ku raacsanahay, waxaan u gudbinaayaa Salaad oo noo hadli doona jeeniga.

Salaad: Jeenigu, marka ugu horreya, meeshaas sararta dhinaceeda ah ayuu saaran yahay; waxaana ugu horreeya oo u korreya garab. Garabkaas cudud baa soo dhexgasha, afar xubnood buu u qaybsan yahay. Cududdaasi garabkey waxay ka gashaa meel aad xeero moodid. Cududdu, haddana, hoos u soo degaandegtaan oo tagoogtii yaa ku taal. Tagoogta iyo cududda waxaa kala dhex gala laf yar oo la yiraahdo siraansiriq ama xilliduubi oo labadaas xubnood isku xira,meesha ay iska soo gelayaanna waxaa la yiraanda tagoogta sandheer. Tagoogtu caarad dheer by bixisaa, labay noqotaa, mid yar baa markaas saas u soo dhahda oo midda sandheerta la yiraahdo bay la socotaa oo laako saas ah weeye. Waa ka sii degaandegtaa markaa majintii ayaa soo gasha; kor majintii, majin baa laga yiraahdaa. Majin markii la yiraahdo seedo ayey yeelataa. Markay seedahaas yeelato, siraansiriq wax la yiraahdo yaa meel dhexe ku jira oo ayagana lafo yaryar ah. Lafahaas waa ka sii baxdaa, seedihii hoose markay tagto, laftaasi ayadu naftigeedu waa laba oo isasaaran, mana kala go'na oo waa laba saas ahoo sinan weeye, lafta majinta ahi oo dhudhunka ah (dhudhunna waa la yiraah). Labadaas waxaa ka sii baxa laba ciddiyood oo yaryar, kuwaas qanjaafullaan niraahdaa; kuwaas sii horeeyana oo ay dhigtaanna dhilaandhilaan niraahdaa oo waxaa iyagaas ku dhexjira lafo la yiraah kurtumo-dhaaf. Kurtumodhaaftu waxa weeye laba xubnood oo midu xoogaa dheertahay oo waa midda korreysa, miduna waa midda cidida gashoo waa yartahay, oo xoogaa waa ballaaran tahay. Aniga intaasaan jeeniga ka garanayaa oo aan aqaan.

Shir guddoomiyaha: Haddii ayan jirin cid kaloo dacwad ka qabtaa, anigu waa gudbayaa, waxaana u gudbinayaa Siciid oo aan ka rabnaa inuu nooga sheekeyo, oo ku soo aaday, waxa la yiraaho qoor oo ka bilaabata sarraxa ilaa maca madaxeeda wadata iyo qoorta halkaas. Bal qoorta intay tahay, takhtarna waa yahaye oo sheekadaas waxaan u qabaa inaad naga wada badiso. Marka sarraxa iyo durbaanka neefka oo labada gees saas uga reebno, qoorta maca tumankeeda inta hilib ku jira iyo inta laga gooyo.

Siciid: Marka ugu horreeysa, cadkaas waxa la isku yiraahdaa qoor oo waa inta xoolaha marka la qalaayo la si-raacsiiyaa oo ariga iwm oo tunks ilaa madaxa intaasi waa is-raacdaa. Marka horoo neefka la gawraco madaxaa laga jaraa dabadeedna qoortii baa isla hadha, labada jeeni ilaa meeshii gowracu ku dhacay inta u dhexeysa uun baa la israacsiiyaa. Hilib baa marka hore labada dhinac kaga yaal, waa la qalaa, hilibkaasi tun baa la yiraahdaa, waa la isku geeyaa labadiisa wasladoodba oo midba baa loo gooyaa oo tun baa la yiraahdaa (tuman). Markii lafihii loo dhaadhacana, laba qaybood bay u qaybsamayaaniin; miduna waa tii gowraca xigtay oo waa

luquntii, miduna waxay raacdaa araxda oo waa ka lafo badan tahay qaybta hore oo feerihii baa soo gelaaya iyo karreysaha. Madaxu markuu idaha yahayna waa qayb, markuu riyaha yahayna waa nooc. Riyaha iyo idaha, macasha oo ay iduhu leeyihiin mooye oo ayan riyuhu lahayn, lafaha iyo hilibka kale waa isaga mid. Sida aynu u wada naqaanno madaxiina waa laba qaybood oo fuqa-hoose iyo fuqa-sare ee uu baniaadamkuba leeyahay. Fuqa hoose haddana waa qaybsamaa oo wuxuu noqdaa lada daan oo waa sinan yihiin oo waxay isagu yimaadaan garka, labadooda dhinac ee kale waxay, ayagoo geeso leh, ku jiraan madaxa qaybtiisa sare oo ay meel kaga jiraan. Marmar waxaa dhacda, qofka hadduu hamaansanaayo, inay kala fakadaaniin oo, waxaad mooddaa inayan ahayn wax xuubka haysta. Qofka markuu hamaansado marmar waa kala dhilqadaan oo waxaad mooddaa wax meel haysta inaysan ahayn oo cad yari isku celinaayo. Haddii la yiraahdo hilibka madaxa halla tiltilmaamo waa: carrabkii, dhegihii iyo qaybahaa. Midda weyna waxaa ku sii jira maskaxdii oo baiiaadamka hoggaaminaysay oo ku dhex abuuran oo ku dhex jirta, indhihii baa ku jira.

Shir guddoomiyaha: Bal aan anigu isku dayo oo aan xoogaa kugu sii darsado. Horta waxaynu niri: sarraxii baynu goynay. sarraxii baynu kala qaybinaynaa, waxaan u kala qaybinay luqun iyo tuman. Marka, luquntii xagga aan dhiganno oo aan soo qaadanno tumankii. Tumankii labo aan ka dhigno. Tunkii labo ayuu noqonayaa oo wuxuu wataa karreysyo. Luquntii, tunka marka laga qalo, luqundheer bay noqonaysaa oo gowraca meeshiisa ayey iman. Maadaxii wuxuu u qaybsamaa labo fuq (fuqa sare iyo fuqa hoose ) iyo labada daamood oo ka baxa. Labada daan kan hoose carrabka ayaa dul saaran. Madaxa waxaa kale oo ku jira ilko oo ku taxan daanka sare iyo daanka hooseba. Madaxa fuqa sare waynu qaybinaynaa oo waxaynu u qaybinaynaa misna ilgoonno, waxaan kale oo sheegeynaa ilxeyrro, dhego, canqar, maskaxdii baa iyana ki jirta.